

# U diyaargarow inaad is-diiwaangaliso oo aadna codeeyso



**ELECTORAL COMMISSION**  
TE KAITIAKI TAKE KÖWHIRI

## Maxay tahay sababta aan iskugu diiwaangalinayo inaan codeeyo?

Haddii aad isku diiwaangaliso inaad codeeyso, waxaad cod ku leedahay doorashooyinka guud, kuwa deegaan iyo wixii afti ah. Doorashooyinku waa fursad aad ku helayso inaad wax ka dhahdo cidda kugu matalaysa arrimaha aad danayso.

**Waxaad xaqiijin kartaa codkaaga in la maqlo adigoo isku diiwaangalinayo inaad codeeyso.**



## Yaa is diiwaangalin karo oona codeyn karo?

Waxa waajib ah inaad is-diiwaangaliso haddii aad:

- tahay 18 sanno jir ama ka weyntahay, iyo
- tahay muwaadin New Zealand ah ama dadka sida rasmiga ah u deggan New Zealand, iyo
- waqti ka mid ah noolashaada si joogto ah ugu nooleyd New Zealand in ka badan hal sanno.

Haddii aad tahay reer Australia, Cook Islands Māori, Niuean ama Tokelauan, waxaad kaliya iska diiwaangalin kartaa haddii aad muddo 12 bilood ah si joogto ugu noolayd New Zealand.

Haddii aad ku nooshahay waddan dibada ah waxaad iska diiwaangalin kartaa Doorashad Guud ee 2023 haddii aad:

- tahay muwaadin reer New Zealand ah oona si joogta ah u joogay New Zealand 6-dii sanno ee ugu danbeysay, ama

- tahay qof si rasmi ah u deggan New Zealand oona horay u joogay gudaha New Zealand 4-tii sano ee ugu danbeeyay.

Wixii ka dambeeya doorashada 2023 tani waxay dib iskugu beddeli 3 sano marka la eego muwaadiniinta reer New Zealand iyo 12 bilood marka la eego dadka sida rasmiga ah u deggan New Zealand.

Ujeedooyinka doorasho dartood, deggane rasmi ah waa qof kasta oo sifo sharci ah ku deggan New Zealand oo aan laga rabin inuu waddanka kaga baxo wakhti go'an. Kan waxa ka mid ah cidda fiise degganaansho haysata.

Waxaa isdiiwaangalin kartaa markaad gaarto 17 jir. Markii aad gaartid 18, si otomaatig ah ayaa lagu diiwaangalinayaa waxaadna diyaar u ahaaneysaa inaad codeysid.



## Sideen isku diiwaangaliyaa?

Waa wax fudud inaad isdiiwaangeliso ama cusboonaysiiso macluumaadkaaga. Waxaad awoodaa:

- inaad booqato **vote.nz** oo aad isticmaashid shatigaaga darawalnimada New Zealand, baasaboorkaaga New Zealand ama aqoonsigaaga RealMe ee la xaqiijiyay si aad iskaga diiwaangeliso onlaynka
- bilaash ku wacdid **0800 36 76 56** oo aadna ka codsatid in foom lagu soo diro

Markii aad is diiwaangelisid, magacaaga wuxuu ku darsamayaa liiska dadka loo ogool yahay inay codeeyaan. Waa inaad kujirtaa liiska dadka loo oggol yahay inay codeeyaan si aad u codeysid. Waxaad u baahantahay inaad cusbooneysid macluumaadkaaga waqti walboo aad guri ka guurtid.



## Ma ka walaacsantahay badbaadadaada shaqsi ahaaneed?

Haddii aad ka walaacsantahay badbaadadaada shaqsi ahaaneed, ama midda qoyskaaga, waxaad codsan kartaa in lagugu daro liiska dadka loo oggol yahay inay codeeyaan ee qarsoodiga aana la daabicin. Waxaan ku hayneynaa macluumaadkaaga diiwaangelinta si badbaado ah oo qofna ma siineyno.

Booqo **vote.nz** ama soo wac **0800 36 76 56** wixii warbixin dheeraad ah iyo foomka codsiga.



## Ma u baahan tahay caawimo si aad isku diiwaangeliso?

Waxaad weydiin kartaa qof aad garanaysid, sida saaxiib ama xubin qoyska ah, ama waxaad weydiin kartaa kooxdeena isdiiwaangelinta, si ay kaaga caawiyaan buuxinta foomka diiwaangelintaada, ama kuugu buuxiyaan foomkaaga.

Waxaad u baahantahay inaad saxiixdo foomka. Haddii aad garanaysid qof aanan buuxin karin oo aan saxiixi karin foomkooda diiwaangelinta maadaama uu qabo curyaannimo jireed ama dhimir, waxaa kuu suurto galeyso inaad caawisid. Booqo **vote.nz** si aad wax badan uga ogaatid ka caawinta qofka iska diiwaangelinta inuu codeeyo.



## Iska diiwaangelinta inaad codeeyso haddii aad tahay Māori

Haddii aad ka soo jeetid Māori oo aad isdiiwaangelineysid markii kuugu horraysay, waxaa kuu yaala go'aan muhiim ah oo ay tahay inaad qaadato. Waxaad u baahantahay inaad go'aansatid liiska dadka la oggol yahay inay codeeyaan ee aad rabtid inaad ku jirtid: liiska guud ama liiska Māori. Go'aankaaga ayaa saamaynaya goobta aad ka codeynayso doorashada guud.

Haddii aad dooratid liiska doorashada guud, waxaad u codeyneysaa musharax doorashada guud.

Haddii aad dooratid liiska Māori, waxaad u codeyneysaa musharaxa ka tirsan Māori.

Waxaad u codeyneysaa isla liiska xisbiyada siyaasadeed liis walboo aad ku jirtid.

Liiska aad dooratid waxay saameyn kartaa qaabka aad ugu codeysid doorashooyinka deegaanka. Haddii aad ku jirtid liiska Māori oo maamulka deegaankaaga leeyihiin qeybta ama degmo-doorashada Māori, waxaad u codeyneysaa musharaxiin kujiro qeybta ama degmo-doorashada Māori.

Waad baddali kartaa liiska aad ku jirtid markii aad rabto marka laga reebo 3-da bilood ee doorashada guud iyo doorashooyinka deegaanka ka horreeya, iyo xaaladaha qaar ka horreeya doorashada baarlamaanka ee buuxinta boos bannaan.



## Macluumaad dheeraad ah ma rabtaa?

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaangelinta iyo codeynta:

- booqo **vote.nz**
- wac **0800 36 76 56**

Macluumaadka ku saabsan isdiiwaangelinta iyo codeynta waxa lagaga heli karaa luuqado badan barta **vote.nz**



**ELECTORAL COMMISSION**  
TE KAITIAKI TAKE KŌWHIRI